# KA JAWAAB CELINTA XAALADAHA DEG DEGGA AH EE ABAARTA SOOMAALIYA

## 01 JANAAYO - 11 DISEMBER 2017

Xaaladda bani'aadamnimo ka jirta Soomaaliya waxa qarka u saarantahay in ay gaarto heer musiibo ah, waxaana sii kordhaya walaaca ah in dhabaha ay ku socoto si wel wel leh ula mid tahay musiibadii abaartii ka dhacday Soomaaliya 2011-kii oo dad lagu qiyaasay 260,000 qof ay ku naf waayeen. Maanta dad lagu qiyaasay 6.2 malyan oo ah in ka badan kala bar dadka dalka waxay wajahayan cunto yari ba'an, tirada caruurta oo nafaqo-darro ba'an hayso way sii kordheysaa. Xaaladdaan quusta ah waxay imaaneysa colaad dabadheeraaday ka dib taa oo carqaladeysay hab-nololeedka iyo adeegyada muhiimka ah sida caafimaadka iyo biyaha. Guddiga Caalamiga Laanqayrta Cas (ICRC) oo wadajira Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) iyo shabakadeeda mutadawiciinta baaxadda weyn waxay sii wadaan in ay Soomaaliya ka caawiyaan bulshooyinka abaartu saameysay oo ku sugan goobaha colaada u nugulyihiin oo ay adag tahay in la gaaro.

## HAWLAHA GARGAARKA

**450,696**
QOF
waxay heleen cunto ka kooban 50 kg bariis ah, 25 kg digir iyo 10 litar oo saliid ah halkii qoysba

**110,142**
QOF
waxay heleen waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qoyska


**$**
**481,806**
QOF
ayaa taageero dhanka dhaqaalaha ah oo lacag caddaan ah heleen

## HAWLAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA

**395,642**
QOF
waxay daryeel caafimaad ka heleen 25-ka bukaan-socod eegtooyinka SRCS iyo 6 rug caafimaadka wareega

**42,245**
QOF
caruur da'dooda ka hooseyso shan sano oo nafaqo dari haysay ayaa lagu daweeyey xarumaha xanaanada deg degga iyo bukaan-socod eegtooyinka SRCS.

**7,251**
QOF
qof ayaa la dhigay xarumaha lagu dabiibo daacuunka oo ku kala yaalaan Isbitaalada Kismaayo iyo Baydhabo



## BIYAHA IYO NADAAFADDA GUUD

**172,100**
QOF
waxay heleen biyo iyagoo loo dhisay loona dayactiray 21 ceel

**538,403**
QOF
waxay ka faa'ideysteen helitaanka biyo aan halis lahayn oo nadiif ah iyagoo loo sameeyey daaweynta biyaha qoyska, sahayda biyaha oo koloriin loogu daray iyo dhiirigelinta kor u qaadida fayo-dhowrka

**12,430**
QOF
waxay ka faa'ideysteen dhismo iyo sii qodis ceel-gacmeedyo.

# 2,024,130*

## DADKA LA CAAWIYEY

*Shakhsiyaadka ka faa'ideysanaya mid ama wax ka badan ee gargaarka waxay isugu jiraan cunto, waxyaabaha lagama maar maanka u ah qoyska, caafimaadka, biyaha iyo nadaafadda guud

### Tusmo

- Cuntada
- Waxyaabaha Lagama Maarmaanka u ah Qoyska
- Lacag caddaan ah
- Daryeelka caafimaadka
- Xarumaha daaweynta
- Xarumaha xanaanada deg degga
- Ceel-gacmeed
- Ceel
- Goobaha biyaha

URURKA BISHA CAS SRCS

ICRC

Khariiradaan ujeedkeedu waa macluumaad keliya mana laha muhimad siyaasadeed.